# BAYAAN RASMI AH

**Taariikh: 01 Aug 2026**
**Goobta:** Muqdisho, Soomaaliya

## BAYAAN RASMI AH OO KU SAABSAN ILAALINTA QOONDADA %30 EE HAWEENKA EE DOORASHADA GALMUDUG.

Wasiirka Wasaaradda Qoyska iyo Horumarinta Xuquuqul Insnaaka ee Xukuumadda Federaalka Soomaaliya Amb Khadiija Maxamed Al-Makhzoumi ayaa ugu baaqdey dhammaan xisbiyada siyaasadeed ee ka qaybgalaya doorashada ka dhacaysa Dowlad-Goboleedka Galmudug inay xaqiijiyaan ilaalinta iyo hirgelinta qoondada haweenka ee ugu yaraan 30% marka ay soo xulayaan musharraxiintooda.

Ka-qaybgalka haweenka ee siyaasadda iyo go'aan-qaadashada waa xuquuq dastuuri ah iyo waajib qaran. Dastuurka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya wuxuu xaqiijinayaa sinnaanta muwaadiniinta iyo xaqa ay haweenku u leeyihiin inay si buuxda uga qaybqaataan arrimaha siyaasadda iyo hoggaanka dalka. Sidoo kale, shuruucda doorashooyinka dalka iyo Sharciga Xisbiyada Siyaasadda waxay xoojinayaan muhiimadda ilaalinta iyo kor u qaadista matalaadda haweenka.

Qoondada 30% ee haweenka waa ballan-qaad qaran oo Soomaaliya ay muddo dheer ku hawlanayd, waana tallaabo muhiim u ah dhismaha dowlad loo dhan yahay iyo nidaam siyaasadeed oo matala dhammaan bulshada Soomaaliyeed.

Sidaas darteed, waxaan xusuusinayaa dhammaan xisbiyada siyaasadeed waajibaadkooda qaran ee ah inay xaqiijiyaan matalaada haween oo macno leh, kana fogaadaan in haweenka laga reebo ama lagu koobo ka-qaybgal aan la jaanqaadayn kaalintooda bulshada Soomaaliyeed.

Waxaan sidoo kale ugu baaqayaa Guddiga madaxa banaan ee Doorashada iyo hoggaanka Dowlad-Goboleedka Galmudug inay si dhow ula socdaan hirgelinta qoondada haweenka, isla markaana hubiyaan in geeddi-socodka doorashadu noqdo mid loo dhan yahay oo ixtiraamaya mabaadi'da sinnaanta.

Waxaan si gaar ah u caddeynayaa in qoondada 30% aysan ahayn deeq loo fidinayo haweenka, balse ay tahay hannaan lagu xaqiijinayo xaqooda dastuuriga ah ee ka-qaybgalka siyaasadda, matalaad caddaalad ah, iyo dhismaha dowladnimo loo dhan yahay.

# BAYAAN RASMI AH

**Taariikh: 01 Aug 2026**
**Goobta:** Muqdisho, Soomaaliya

Waxaan ku boorrinayaa dhammaan daneeyayaasha doorashada Galmudug, xisbiyada siyaasadeed, hay'adaha doorashada, madaxda dowlad-goboleedka, bulshada rayidka ah iyo shacabka Soomaaliyeed inay ka wada shaqeeyaan xaqiijinta doorasho loo dhan yahay oo haweenka Soomaaliyeed ay ku leeyihiin kaalinta ay mudan yihiin iyadoo aan xusayo in haweenka Galmudug ay yihiin qayb muhiim ah oo nabadda, horumarka iyo dowlad-dhiska kaalin muuqata ku leh.

--- **DHAMAAD** ---